Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 6-aad, Fiiri Lifaaqa Warbixinta G.Maaliyadda.

Documentiga kalfadhiga 6-aad, kulankiisa:14-aad Tr:24.06.2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa:14-aad,Sacad furi.11:10 gh,Sacad Xir.3:15 gd.

Guntinta:146 Xildhibaan.

Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Dhaarinta Xildhibaan Cusub (M.Ne.Guuleed Xasan Dirir oo bedelay Marxuum Yuusuf Dirir Cabdi)**
4. **Warbixinta Guddiga Maaliyadda**
5. **Dood Furan:Xaaladda Dhaqaale iyo Siyaasadeed ee Dalka.**

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya

Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna xildhibaan:Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha wuxuu xildhibaanada ka codsaday in ay ansixiyaan ajendaha

xildhibaanada wey ansixiyeen ajendaha.

Waxaa la dhaariyay xildhibaan cusub Mudane:**Guuleed Xasan Dirir**,oo dhaariyay xildhibaan:Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu u yeeray, Guddiga maaliyadda si ay golaha ugu hor akhriyaan warbixinta Guddiga Maaliyadda,waxaa Golaha ka hor akhriyay Xildhibaan:Mahdi Cali Cumar,oo ka mid ah Xubnaha guddiga maaliyada.

Xildhibaan:Mahdi Cali,oo xubin ka ah guddiga Maaliyadda ee Barlamaanka, Mudanayaal,ka dib markaan daraasad ku sameynay dakhliga iyo kharashka shantii bilood ee January ilaa may iyo caqabadaha dhaqaale ee dalku manta ku sugan yahay waxaan halkaan idiinku soo gudbineynaa warbixin kooban oo ku saabsan dakhligii iyo kharashkii shantaas bilood oo la soo dhaafay caqabadaha jira oo sababay hoos u dhaca dakhliga iyo qaladaadka ka jira ee dhinaca kharash bixinta.

Intaa ka dib waxaa bilaabatay Su'aalihii ku saabsana warbixinta guddiga maaliyadda.

Xildhibaan:C/laahi Jaamac,wuxuu soo jeediyay,waxan rabaa in an labo arimood ka hadlo mid waa dhaqaalaha guud,wasaaradda maaliyadda bajadka oo kaliya ma maamusho dhaqaalaha wadanka masu'liyad bey ku ledahay iyada iyo bankiga dhexe iyo hay'adaha dhaqaalahaba,waxa leysku haysta dhaqaalaha la soo ururiyay kaliya mahan,laakiin jan goyada dhaqaale lagama fekerin golaha wasiiradda kama jirto xubno siyaasada dhaqaale ka shaqeysa oo jaan goya,arrintaas in uu barlamaanka ku baraarugo ayan u banahay,dalka bur-bur ayuu ka soo baxay in la yiraahdo dhaqaalaha xagee u socda sharci canshuuro lama hayo,waxaan barlamaanka soo hor dhigeyna warbixin dhaqaale cilada ka jiro sida loo dhameystiri laha.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi Fadhaya,wuxuu sheegey,ciidamada waa kuwa an maalin walba aan u doodno mahan in wax walba la dabolo,wad cadeysan in lacagta lagu tagri falay, dhaqaalihii leysku haystay wad cadeysan in uu maqan yahay, waxan jogna meeshi sharciga laga ilaalinayay waa in guddiga maaliyadda noo soo cadeeyo,waa in la xisaabtan dhab ah la layeesha waa in la helaa masu'liyiinti wasaaradda maaliyadda,sanadkii **2012kii,**xildhibaanadii golahan kala wareegnay bajadkii loo diyariyay oo lix bilood aha waa lala baxay,waa in aan helno cida la baxday iyo goorta la bixiyay hadii an la helin cilada sideda ayay u taagan tahay,wa in si cad lo sheega goorta la bixinayo.

Xildhibaan:Cabdi Bare,wuxu soo jeediyay,arrintan u yiri xildh. Fadhaye,guddiga maaliyadda maahan order ee wixii qaldan bey soo sheegen,shilin kasto meesha uu ku baxayo waa in barlamaanka u yeera,Hanti Dhowraha Qaranka iyo Xisaabiyaha guud iyo xeer ilaaliyaha qaranka.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,mudanayaal waxa is qortay 37xildh Waxan doonaya in manta la dhameeyo doodan looma kala kacayo waayo waxaa inoo yaala ajendayaal kale oo muhiim ah,xildhiban kasto waa in uu hadlaa 3daqiiqo aan wada shaqeyno mudanayaal.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yuusuf,wuxuu sheegey,waxaad mooda qaabka aynu ka sugeynay in jawabta loo bixiyo si ka gidisan in guddiga maaliyadda ay u keenan jawaabta waxey ahayd qodobo ayaan weydiinay oo ah qarash-ka meesha uu ku baxay iyo cida uu ku baxay in la soo cadeeyo,waxan rabnaa lacagtii ciidamada oo gaareysar**($16malyan)** mashay ku baxday waxaa kaloo an rabnaa **($3.700.000)**mashay ka baxday,shaqadi lagu qabtay,cidii ku safartay in naloo cadeeyo waxaa kaloo rabnaa lacagta ah**($ 5.500.000)**oo la yiri deeqa loo baxshay in la sheego mashay ka baxday, guddiga maaliyada waxay ahayd in ay yiraahdan maalin hebel meeshas ayaa loo safray,maalin ta kale meeshas ayaa la tagay,maalinta kale meel habel ayaa diyaarad loo racay wayo waxa ognahay in lacag lagu qaato safaro oo been ah.

Xildhibaan:C/laahi Goodax Bare,wuxuu soo jeediyay,xildhibaanadii iga horeya-y ayaan la qabaa in barlamaanka la soo hordhigo, guddigana masawir aad u madow aan qurux badnayn ayay kenan, waxey noo sheegan daqligii la sugay ay in aan la helin sababaha loo heli waayayna wey shegan, dowladihii bixinay ay deeqaha oo noogu talagalay wey la noqdeen xukuumada lacagta lala noqday siday ku kasban lahayd wey aqoon weyday marka hore in ay sheegan ayay ku qurux badneyd anaga siyaasiyiin ayaa nahay dowladahas oo kala ah **Turkiga,Norwey,** in ay la noqdan wax sahlan maaha deeqdii dibada sidas ayay ku istagtay,daqliga kale ee canshuuraha waxay noo sheegan in xeer ja-jab lagu qabto, in ayna waxba soo galin hadii ay soo gashana in sixun loo isticmaalo haday safari tahay iyo hadii ay tahayba wax mudnaanteeda la daba mariyay,**Guddoomiyaha Barlamaanka,**wuxuu ku sime Madaxweyne ahaa **(286 maalmood)** anaga uma dooran in guddoomiye barlamaan uu noqdo Madaxweyne lacagta meeshas ayay martay barlamaanka waxa uu sugayay in la horkeeno iyadoo sababeysan guddiga maaliyadda in taas oo dhib ah markii ay sheegan wax talo bixin ah ma bixin iyo sida dhibka logu bixi lahaa.

Xildhibaan: Maxamuud Cali Dhuux,wuxuu sheegay,wax qarsoon ma jiraan guddiga maaliyadda iyo xildhibaanada nin walba afkuu wareejinayaa waxan idiin sheegaya barlamaankii hore wixii ka qaldamay oo miisaaniyad ah dadkii joogay baatihiin mabi'dii hadii aan leenahay in aan ka war wareegano mahan dowlada miisaaniyad ayay soo dajisay Barlamaankana waa ansixiyay,wax dukumenti oo cadeynayo ma jiraan,waxaan ku talinayaa in la baaro wasaaradda maaliyadda,golaha wasiiradda wadankan xog ogaal uma aha,wasaaradda maaliyadda waa in kalsoonida lagala laabta.

Xildhibaan: Xuseen Carab Ciise,wuxuu soo jeediyay, waxan la qabaa xildhibaanadii hore oo ah in guddiga maaliyadda wax cusub nagu soo kordhin wasiirka waxa uu sheegey unbay ku soo celiyeen,guddiga waa in ay noola yimaadan talaabadii laga qaadi lahaa madama ay u arkan in sharci daro lagu socdo,guddiga iyo wasiirkaba waxay barlamaanka hortiisa ka cadeeyan in deeqihii dibada ka imanayeen in la joojiyay sababtana nalooma sheegin dadkii mudnaanta siin waayay ciidamada u dhimanaya daradood,adinka kalsooni masiin lahaydan,wasiirka hal kan wuxuu ka yiri (**35% ciidamada)** ayaa qaatay, lacagtii mareykanka ka imanaysay ma koontarolno meeshay jirto ma garaneyno,xeer ilaaliyaha halkan ayuu soo istagay wuxuu yiri wax cad ayaan haya aaway,cid alaale cidii dambi gasha waa in sharciga lala tiigsada,guddiga maaliyadda talaabadii la qaadi lahaa ha sheegto Hanti Dhowraha Qarank anka waa in uu warqad qoraa qofkii hantida qaranka ku tagri fala waa in sharciga lala tiigsadaa.

Xildhibaan:Maxamed C/dulle Gesay,wuxuu sheegey,qaadista canshuurta dowlada federaalka inta laga qaadi karo gobolka banaadir ayaa laga qaada dadweynaha wey dhiban yihiin,maamulada kale oo jira waxaa xaq ahayd canshuurta in ay ku soo wareejiyaan dowlada dhexe,wey u madax bananyihiin in ay la xisaabtamaan dowlada dhexe,shaqaalihii ka shaqeynayay Dekada oo hada ka hor dacwadooda idiin timid oo cadad koda aha(shankun shaqaale) dacwa dooda wali waa tagantahay oo xuquuqdooda waa la qataa,shacabki an wakiil ka ahayn oo barlamaanka u soo cawday sidas ayay u dulman yihiin, waxan tagney Air porka isagana wa la mid,ninka ugu sareyo Dekada ayaan u tagnay wuxuu yiri xuquuqdooda wan bixinaa,marka xagey ku maqantahay kuwa qaatay waa in aan ka soo celino.

Xildhibaan:Bishaar Ugaas Ibraahim,wuxuu soo jeediyay,waxaan la qabaa xildhbaanadii hore guddiga anaga kama sugeynin warbixin,waxan ka sugeynay talaabada laqadi lahaa iyo qaabka loo qaadi lahaa,warbixinta guddiga waxa

ku jirtay lacagtii laga joojiyay xildhibaanadii hore ee akoonka ku dhacday bankiga dhexe waxaa lagu joojiyay af soomaali masu'liyadas waxaa is kaleh xisaabiyaha guud ee qaranka ,guddiga waxa uu qeexay in aan la raacin hab-raacii miisaaniyadda,hadii aan la raacin waxay ahayd in aan la dajin,waxaa masu'l ka ah wasaaradda ku shaqada leh iyo wasiirka xilka u hayo,anaga waxan nahay sharci dajiyayaal wixii golaha ka soo baxo waa sharci hadii aan la fulin waxa la hareer maray Dastuurka.

Xildhibaan: Samaan Sheekh Daahir, Point of Order,uu qaatay xildh.maxamed cabdi yusuf,wuxuu sheegey,guddiga wixii doraad halkan laga sheegayay in uu soo cadeeyo, Bishaarna waa ku raacay rai'yigaas,waxaan idiin sheegayaa wa jibaadka anaga nala siiyay ajendaha ayuu ku qoran yahay ee afka nalooga-ma sheegin,in aan wax baarno nalooma soo dirin,anaga waxaa nala yiri xaalada guud ee maaliyadeed ee dalka ka soo hadla, xaalada guud ee maaliyada inta aan ka soo helnay waa inta an hada keenay,waxan diidayaa waxan ajendaha ku qornayn in la qalociyo.

Guddoomiye ku xigeenka 2aad, Mudane:Mahad Cabdala Cawad,wuxuu soo jeediyay, guddiga waxaan idiinka rabnaa in aad laba aytam noo kentan oo ah (16 malyan) oo tan xoolaha ah iyo (13malyan iyo jajab) oo tan safarka ah details keeda in aad noo kentan iyo gobolada wixii ku baxay in aad wasaar-ada nooga kentan.

Xildhibaan:Xiis Muuse Cowl,wuxuu sheegey,wasiirka markii uu halkan yimid warbixin ayuu bixiyay guddiga ayagaa loo xilsaray guddiga maahan in ay yiraahdan weydiya xisaabiyada guud wax alaale wixii ditalis ah ayaga la kulma hadii xisaabiyaha la keeno mala xisaab tameysan mase dhinac baad ka jirtan guddoonka hadii qaraar la keeno qalinkiina maqabta dhibka oo dhan guddoonka ayuu ka jiraa ee waxan lee nahay na nabad gali.

Xildhibaan:C/qaadir Aadan Nuur C C,wuxuu soo jeediyay,daqliga ma lagu huba qasnada dowlada mase lagu cabiray qiimaha laga soo xareeyay qara-shyadii la kala hormariyay miisaaniyadda in aad keentaan Bankiga dhexe in ad tagtan lacagaha laga bixiyay warbixinteeda in aad soo raacisaan cidii lacagtas celisay maxkamad ayay mudan tahay waa in barlamaanka dib loogu soo celiyaa ka dibna waxaa loo baahan yahay hantida dowlada inta la qiimeeyo shaqaalaha mushaar looga dhigo waayo meel cidla ayay ku baba'-aysaa, labada kontarool qarashka ka soo gala Dekada ayay lamid tahay,aya-gana haday soo xaroodan wey ku filan yihiin mushaarka shaqaalaha.

Xildhibaan:Cali Xasan Eelow,wuxuu sheegey,wax walba wey cadyihiin wax badan ayaa wasiiro la horkeenay oo loo yeeray cid wax ka qabatay malahan ha leyska daayo oo yan loo yeerin wasiir dambe guddiga waxaan u soo jeedinaya ra'iyiga ay ka qaban in ay soo gudbiyan.

Xildhibaan:Axmed Ducaale Xaaf,wuxuu soo jeediyay,daqli waa soo xaroodaa canshuurtana boqol meel ayay ka timaadaa wali wax koontarolaya ma jirto qof shaqo laga saaray majiraa,waxan leenahay laba naas oo kala ah Dekada iyo Air porka, canshuurtii dadka way diidan waayo meel munaasab kuma baxdo,waxa socda qaado aan qatee, boob ayaa socda cadaalad daro ayaa jirta shacabow isma qaban karno maalin walba hebel ayaa qaata halkan halaga cadeeyo qofkii wax dhaca hala soo qabto sharciga hala geeyo.

Xildhibaan:Axmed Aabi Aadan,wuxuu sheegey,guddiga howl badan ayay soo qatan guddiga maaliyada waxyabaha dhiman wan ka sugeynaa hadii dakhliga laga filayay(100.000.000) in ay ka soo xarootay (49.000.000) waxan qabaa mar hadii aan leys ciqaabayn dunuubta lagama baxayo, 3 sano ayaan jognaa wali ma aragtan qof la ciqaabayo waa in loo yera,Rai'sal wasaaraha,wasiirka wasaaradda maaliyadda, Hanti dhowraha,xisaabiyaha guud .

Xildhibaan:Maxamed Afaraale,wuxuu soo jeediyay,waxaa la rabaa guddiga maaliyadda in ay ku soo noqdaan barlamaanka dakhli lama la' waxaa jira dad shirkad la ah ganacsatada maxaa loo bas gareyn wayay sharcigii ganacsiga iyo kii is gaarsiinta,sharciga canshuuraha isagana yaa hortagan in wax walba la basgareyo,waxaa nala yiraahdaa taga gobolada warbixin ka kena qaata **$1500,**markaan tagno oo an soo noqono nalama siiyo lacagtii aanku safarnay maxay ku dhacday.

Xildhibaan:Faarax Cawad,wuxuu sheegay, hantidii umada waa la boobayaa 63% hantidii qarankey ahayd wax walba waxaa shirkad lagula noqday ajnabi xoolaha la boobaya dad baa ku hoos nool dad kale ayaa lagu nas nujinayaa wasaaradda maaliyadda wey fashilantay mar hahii miisaaniyadii ay is waa fa jin weysay canshuuraha bariga waa la qaada 3% qeybna wasaaradda maaliyadda qeybna dowlada hoose waxay ku dhacdaa meel qas ah waa in aad keentan go'aan cad.

Xildhibaan:Cabdi samad M. Maxamuud,wuxuu soo jeediyay,guddiga maahan guddi kumeel gaar ah waa guddi joogta ah shacabka maalin walba waxay yirahdan waxbaa la dhaca guddiga waa in ay kanan recomendtion barlama-

anka waxaa la rabaa wixii la keno in ay si sharci ah ku xasilmaan waxay u bahan tahay in guddiga soo cadeyan, lacagtii xildhibanadii hore waxaa la ogaa in ay qasnada dowlada ku jirto hadan waxa la arkay in ay ka maqan ta hay ilaa iyo hada meel lagu saleeyay majirto, ciidanka iyo shaqaalaha ilaa iyo hada wax mushaar lama siin.

Xildhibaan: Xuseen Carab Ciise,Point of order,wuxuu sheegey, wasiirka ayaa cadeyay in shaqaalaha iyo ciidanka ay ka maqantahay 4bilood, meel ay ka baxday aan la ogeyn.

Xildhibaan:Sheekh Aadan Madoowe,wuxuu soo jeediyay,waxan qabaa wixii maqan in la weydiiyo xisaabiyaha guud iyo hanti dhowraha sida cad waxaa maqan nidaamkii dakhliga iyo dariifada sharciga ahayd waa laga bedelay ciidamada xuquuqdooda waa lagu tuntay,askariga markii uu helo xuquuqdiisa ayuu waajibkiisa gudan karaa waxaa ugu wacan madaxda dalka,waxaa mesha ka maqan nidaamka dowlad nimo,waxaa wadan keena uu ku socdaa bur-bur iyo boob,hadii daqliga la soo ururinayo oo la siinayo ciidanka isagaba jidadka ma istaageen,dhaqaalaha wadanka waxa uu galay jaad diyaaradihii jaadka waa la fasaxay kuwii rakaajka waa la joojiyay.

Xildhibaan:Cusmaan Miirow,wuxuu sheegay,lacagtii xildhibaanadii hore in lagu shubay bankiga hadana dib loola baxay waa in meel la saaraa, teeda kale waa in la helaa hanti dhowrayaal fara badan hadaan sidaas la helin waxba ma suurta galayaan, lacag wey timaadaa isla markiina waa lala baxayaa waa in la keenaa Rai'sal wasaaraha iyo hanti dhowraha,waxaan kaloo rabnaa cidii jabisa go'aankii barlamaanka in talaabo sharci ah laga qaado.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,waa muhiim lacagta ka maqan xildhibaanadii hore in loo raadiyo cadadkeda waa 14 malyan.

Xildhibaan:C/raxmaan IBi,wuxuu sheegay,lacagta waa (56 malyan) hadii la qeybiyo waa shan bilood xisaabta si maldahan ayay ku baxaysaa,(11malyan) ayaa bishii soo xaroota side loo qondeyaa, dakhliga naga soo gala qadka waa (2.400.000) oo kun ayay noqonaysaa bishii, waxaan u baaha-nahay in maalin qaas ah laga hadlaa dhibaatada qaadka,hadii la yiraahdo hal maalin qaadkii barlamaanka ayaa joojiyay dhamaan Kenya anagey na hoos imaanayan.

Xildhibaan:Aweys C/laahi,wuxuu soo jeediyay,hadal kaliya waxba ma soo kor dhinayso barlamaanka waa meeshii go'aanka ka soo baxayay waa golahii

sharci dajinta,waxan soo jeedinaya in la fuliyo wixii dhaqan gali lahaa,waxa laga hadlay waa arrinta maaliyadda yayna noqon dood furan.

Xildhibaan:Ibraahim Ilka cas,wuxuu soo jeediyay,wasaarada arimaha dibada shaqada loo idmaday maqabato hanti dhowrka shaqadiisa waa in uu deeqaha soo gala in uu diiwan galiyo waa in la difaaca qaraarka in xukuu-mada ku fashilintay maaraynta miisaaniyadda guddiga shaqo ayuu keenay waa in la fuliyaa, hanti dhowraha wuxuu sheegay in uu hal shilin diiwan galin

Xildhibaan:Duniyo Maxamed Cali,waxey sheegtay,shaqaalahii Dakada sidii la ogaa baaloo galay shirkad al-bayrakh layiraahdo baa maamulata dowlada 55% ayay leedahay, ajnabigana 45% baa la siiyay, aaway qaraarkii aan ka gar nay go'aankeena meel ma gaarayo miyaa,aaway ciidanka lacagtoodii waa la qaatay oo xuquuqdooda ayaa lagu tumanaa.

Xildhibaan:Yuusuf Axmed Cali,wuxuu soo jeediyay,guddiga maaliyada waxan ka codsaneynaa in sahay safarka laga helaa xisaab celinta iyo rasiidki waa in aad weydiisan wasaarada maaliyadda,anaga waxaa nahay guddiga is gaarsiin-nta waxaan rabnaa in aan idiin keeno wax tafaftiran.

Xildhibaan:Cabdalla Boss Axmed,wuxuu sheegay,qof kasta dalka waxa ka dhacaya waa og soon yahay meel bad qabtaa ma jirto,badda,bariga, Dekada, Air porka,sharcigee lagu haystaa Dekadana iyo Air por kana cid sheegi kartaa ma jirtaa, ma kar,karinaa cidii lunsatay hantida qaranka talaabo ma ka qaadna yan been leysu sheegin.

Xildhibaan:Axmed Taaw,wuxuu soo jeediyay,in dhaqankeena sidaas noqdo waan ka xumahay,caalamka waxaa nalagu tiriyaa dadka ugu musuq-maasuqa badan,wa-siirka waxa uu na yiri wixii faah-faahin ah guddiga ayan idiinku soo dhiibaya, waxa laga rabaa lacagtii ku baxday xoreytii waa jid oo gaaraysa ($16 malyan) aaway cadowga laga xoreeyay waajid iyo bakool,waa kala xiran yihiin,waa in ladaba gala arrintan oo fiiro gar ah loo yeesha guddigana loo xilsaaraa.

Xildhibaan:Maxamed cumar Dalxa,wuxuu sheegay,in maamul xumo wax nooga halaban waan la qabaa xildh.Aadan madobe,wadanka dhaqaale waa soo gashaa laakiin waa la boobaa Dekada iyo Airporka lacag wey ka soo gashaa,hawada dalka lacagta ka timado ilaa iyo hada lama hayo hawada carab sadka ayagana boobka ayay wax ugu jiraan xalane waxa jooga 81 shirkadood, oo dhulka waa cabiran yahay, an ka bilowno teena barlamaanka 286 shaqaale aya jooga aawey hada horteena meeqa joogta waa in la sameeya guddi musuq-maasuqa ah.

Xildhibaan: Cabdi Kaafi Macalin,wuxuu soo jeediyay,wixii laga hadlay in ay wax go' aan wax gal ah ka soo baxaan, hadii ay ka soo bixi wayan wax macno ma sameynayso, barlamaanka halis buu ku sugan yahay madaxtooyada xildhiban ma gali karo kuwana ayagoo bastolado wataan ayay galaan

Xogha'yaha Guud ee Barlamaanka, Dr:Buux Xaaji,wuxuu sheegay,waxaan UNDP an wey diisanay bas waan xayay siinay.

Xildhibaan:C/laahi Abshirow,wuxuu soo jeediyay,anaga gaari waan leenahay ma dooneyno bas, waa in naloo sheego goorta la siinayo xildhibaanadii hore waa in daqliga la ururiyay la siiyaa shaaqaalaha iyo ciidanka,xukuumada wey fashilantay deeqaha dibada maalin walba waxaa la yiraahdaa waxaa la suga ($100.000.000 malyan) ayaa timaada hadana ma garanayo mashay ku baxd-ay masu'liyiinta wey taabaneysaa waa in la cadeeya oo qaraar naga soo baxaa hanti dhowrka waan u yareyna,wasiirka wasaaradda maaliyadda wan u yarayna iyo Rai'sal wasaaraha,sahay safar waxa loo qatay ($200.000) shaqa-alaha iyo ciidanka waa baahan yahay hada waxaa imaanayo mooshin.

Xildhibaan:Shariif Maxamed Cabdalla,wuxu sheegay,waa bil ramadaan shaqada inoo taala wey fara badan tahay shaqada waa in dar dar la galiyaa sahay safarka qarash ku baxayo waa in uu soo qoraa sida qarashka u baxay wixii soo haray waa in uu keenaa dhaqaalaha (15 %) ayaa gobolka banaadir la galiyaa.

Xildhibaan:Maxamed Yuusuf,wuxuu soo jeediyay,guddiga xog bay inoo kenan balse waxa ka maqan faah-faahin anka sugeynay maaliyada ciidanka waxa ka maqan 8bilood qofka hadii uu dambi lahayn wax macno ah yeelan meyso ee waxa halkan ka soo baxa halagu dhaqaaqo.

Xildhibaan:Maxamed Aamiin,wuxuu sheegay,guddiga ha ku soo daran Ra-kumandheshin waxaan kaloo jeclaan lahaa in ay ku soo cadeeyan talaab-adii laga qaadi lahaa, sida warka lagu wado in shir ka dhaco 29ka bishan uu hogaaminayo Necholas key maxa kala socota guddoomiye? Masiirka soomaaliyeed in uu agaasimo sow sumcad xumo maahan in aan ka hadalno masiirka 2016ka, masu'liyada anagaa iska leh.

Xildhibaan:Kaamil,wuxuu soo jeediyay,manta in laga dodo oo su'aalo la weydiiyo oo layiraahdo Rai'sal wasaare maxad ka damac santahay 2016ka

Hanti dhowraha wuxuu tagay Dekada iyo Air porka ayaan daro waa la soo diiday sharciga maaliyadda wuxuu sheegaya in wixii baaritaan ah uu leey-ahay hanti dhowrka safarada cid walba baxda wa in barlamaanka lakana

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu u yeeray,guddoomiyaha guddiga maaliyad-da si uu golaha ugu soo jeediyo warbixinta uu hayo.

Xildhibaan:Samaan kheekh Daahir,wuxuu sheegay,xildhibaano waad mah-adsan tihiin amaanta aad no soo jeedisan, shaqadena wan sii wadayna Cida bixisay lacagta waa naloo sheegay,gudddi ayan u xulnay Rai'salwas-aaraha ayaa bixiyay amarkiisa ayay ku baxday wax qoraal ah nalooma sheegin, wasiirka wuxuu yiri culeys ayaa leygu saaray cidii sartay ma garaneyno,wasiirka wuxuu joogay qaahiro,wuxu yiri sidaad rabtan yeela, arrinta ku dhaqnka miisaaniyada na soo gashay waxay ahayd (49 malyuun) (29 malyuun) waxay ku baxday bariyoratigii laga mudnaa baa lagu bixiyay faah-faahinteeda waxay ku qorantahay warqad balaran oo xisaabiyaha guud uu soo qoray,matalada guddiga waxaa lagu dhisaa plenary ga.

Xildhibaan: Maxamed Rashiid,wuxuu soo jeediyay,lacagta xildhibaanadii hore wey baxday sharci bay ku baxday foom No. 3,waxay ahayd 2012 kii 547 xildhibaan oo min 3 bilood ahayd bankiga ayay tagtay guddoomiyaha wey maqnayd nus saac ka dib waxaa la yiri joojiya, af laguma joojin karo wasiirka waa maqnaa iyo wasiiru dowlaha, waxaa diyaariyay xisaabiyaha guud xaashida 248 sharci lambar ayay ku baxday lacagta oo saxda ah sharci soo celin kara majirto, taasi waa la bixin karaa oo kaliya balse lama soo celin karo yaan lagu wareerin hanti dhowraha waxa uu leeyahay ilaalinta maamulka lacagta hishiisyada oo dhan meeshas ayaa laga diiwan galiya,waxaa kale oo jira 81 hay'adood oo Airporka jooga oo sharci daro ah.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay, 41xildhibaan aya dooday wax aa la abaaray miisaaniyada dalka,waxan raba in wax yar ka jawaabo in an qorsho sameysano,manta wixii laga hadlay waxay ahayen miisaaniyada dhaqaalaha cid ka hadashay wey yarayd,waxaan amrayaa guddiga maa-liyada aarahda ay soo jeediyeen xildhibanada in leysku soo ururiyo qaraar-ka go'aanada ka dibna golaha lagu soo celiyo, tan maxamed Aamiin, wax-an ogaa fadhi mar hore la qorshiyay oo la qabanayay 29 juun,waxa la yirahdaa (hayladin) waa Commttee,waxay samey sanayeen qiimayn oo

Ah wixii ay soo qabtan wax kale majiran 2016 anaga in an ka hadalno wey fiican tahay,aniga waxaan diyaar garobay in tii aad fasaxa ku jirtan si aan idiinku keno ayan garan wayay,mar walba mooshin ayaad wadan,barnamij kan wuxuu ku jiraa agshan balanka la idiin qeybshay federaalaynta sida laga yeeli lahaa waxaa loo xilsaray 25 xildhiban, in la ii arko inaan koox gar ah wato marabo wixii laysla ta shanayo in ay xildhi soo doortan ayan raba 3 arrimood wey isku xiran yihiin ma kala fur maayan.

1. Dowlad goboleed side federaalayn loogu dhigi karaa.
2. Waa in barlamaanka soo saran nidaam siyaasadeed oo lagu federal-Laynayo wadanka oo loo tarjumi karo xeer ama sharci oranayo cidallale ci diidooneyso dowlad gobalayd oo xubin ka ah federaalka soomaaliya waa In ay xeerkan soo martaa oo leysku ogyahay sharci ka duwan 2012kii,udub Dhexaad u ah kaas aya lagu keeni karaa nidaamka doorasho,waa in Halkaan go'aan lagu gaara,intaas ayay ku soo urureysaa waa siyaasadii guud.
3. Dimoqraadiyeyn ta dalka iyo Axsaabta siyaasada,waain aan shuruucda ka Faraxalana isbuucan.

Guddiga xuquuqul insaanka waa in ay bari yimaadan villa hargeysa si loo galo akhrinta 3aad ee hindise sharciyeedka waxaa la shaqeynaya guddoomiye ku xigeenka 2aad Mudane:mahad,anigana waxaan la shaqeynayaa guddiga Dastuurka laba maalin, arrinta darbiga Kenya ay dhisayso waxan u xilsaaray 5 xildhibaan,Gaandi,Goodax,Dalxa,Ilka cas, Rabaca.

Kalfadhiga 6-aad, kulankiisa:14-aad,uu shir Guddoominayay Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya,Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan jawari uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 3:15 gd.